تَوْحِيْدُ ألله فِيْ حُكْمِهِ
Xukunka oo Allaah kaligii La siiyo
NASMU

بسم الله الرحمن الرحيم

MUASASADA NASMU WAXEEY IDIN SO GUSBINEEYSAA KITAAB LAGU MAGACAABO

Xukunka oo Allaah kaligii LA siiyo

Iimaanka qofka waxaa kamid ah: in uu rumeeyo in aanay jirin cid sharci dajin karta oo aan Allaah ahayn , iyo in uu allaah Ku tilmaamanyahay tilmaamaha ugu dhamaystirnaanta badan.

Wax aan sharciga allaah ahayn oo wax lagu xukumi karo, ama loo xukun tagi karana aanay jirin.

إِنِ الْحُكْمُ إِلاَّ لِلَّهِ ۚ أَمَرَ أَلاَّ تَعْبُدُوا إِلاَّ إِيَّاهُ ۚ ذَٰلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لاَ يَعْلَمُونَ

}xukunka allaah kaligii ayaa iska leh , wuxuuna amray in aydaan caabudin isaga mooyee sidaasina waa diinka toosan laakiin dadka badankoodu waxba garan maayaan}[Yusuf 40].

أَفَغَيْرَ اللَّهِ أَبْتَغِي حَكَمًا وَهُوَ الَّذِي أَنْزَلَ إِلَيْكُمُ الْكِتَابَ مُفَصَّلًا ۚ

}ma cid aan allaah ahayn (diintiisa) ayaan dalbaa, taas oo aan xaakim ka dhiganayo, iyadoo Allaah uu yahay kan idiin soo dajiyay kitaab faah faahsan} [Al-An'am 114].

أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ ۚ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللَّهِ حُكْمًا لِقَوْمٍ يُوقِنُونَ

}ma xukunka jaahiliga ah ayey doonaayaan , yaa Allaah ugu xukun wanaagsan dadka xaqa yaqiisan} [Al-Ma'idah 50].

Towxiidkan wuxuu leeyahay sadex tiir:

1- Allaah oo kaligii LA siiyo sharci dajinta:

Cid xaq u leh sharci dajin ma jirto oo aan Allaah ahayn

Wuxuuna Allaah Ku tilmaaman yahay tilmaamaha ugu dhamays tirnaanta badan.

Allaah wuxuu yidhi:

شَرَعَ لَكُمْ مِنَ الدِّينِ مَا وَصَّىٰ بِهِ نُوحًا وَالَّذِي أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ وَمَا وَصَّيْنَا بِهِ إِبْرَاهِيمَ وَمُوسَىٰ وَعِيسَىٰ

}Allaah wuxuu idiin sharciyeeyay xaga diinka wixii uu u dardaarmay nabi nuux, iyo wixii aan kuu waxyoonay adiga (nabi muxamad), iyo wixii aan u dardaaranay nabi Ibrahim, nabi muuse, iyo nabi ciise } [Ash-Shura 13].

أَمْ لَهُمْ شُرَكَاءُ شَرَعُوا لَهُمْ مِنَ الدِّينِ مَا لَمْ يَأْذَنْ بِهِ اللَّهُ

}mise waxay leeyihiin kuwa allaah aay LA wadaajiyeen kuwaas oo u dajiya xaga diinta sharci wax uusan Allaah u ogolaan } [Ash-Shura 21].

2- Allaah oo kaligii xukunka LA siiyo:

Ma banaano wax aan Allaah sharcigiisa ahayn in wax lagu xukumo.

Allaah wuxuu yidhi:

وَأَنِ احْكُمْ بَيْنَهُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَلَا تَتَّبِعْ أَهْوَاءَهُمْ

}Ku xukun - nabi muxamadow - dhexdooda waxa uu allaah soo dajiyay hana raacin hawadooda } [Al-Ma'idah, 49].

وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ

}kuwa aan wax Ku xukumin waxa uu allaah soo dajiyay kuwaasi waa gaalo}[Al-Ma'idah 44].

3- Allaah oo kaligii loo xukuntamo:

Ma banaana in loo xukuntamo wax aan Allah sharcigiisa ahayn.

وَمَا اخْتَلَفْتُمْ فِيهِ مِنْ شَيْءٍ فَحُكْمُهُ إِلَى اللَّهِ

}wixi aad isku khilaaftaan xukunkiisa allaah u celiya (kitaabkiisa)} [Ash-Shura 10].

أَلَمْ تَرَ إِلَى الَّذِينَ يَزْعُمُونَ أَنَّهُمْ آمَنُوا بِمَا أُنْزِلَ إِلَيْكَ وَمَا أُنْزِلَ مِنْ قَبْلِكَ يُرِيدُونَ أَنْ يَتَحَاكَمُوا إِلَى الطَّاغُوتِ وَقَدْ أُمِرُوا أَنْ يَكْفُرُوا بِهِ

}ka waran - nabi muxamadow - kuwa sheeganaya in ay rumeeyeen waxa laguugu soo dajiyay iyo wixii hortaa lasoo dajiyay hadana doonaya in ay u xukuntamaan daaquudka waxaana LA amray in ay Ku gaaloobaan daaquudka }[An-Nisa', 60].

Towxiidkaan waxaa burinaaya oo qofka mushrik ka dhigaaya

1- qofka in uu aamino cid aan allaah ahayn in ay xaq u leedahay in ay sharci dajiso , Ama shareecada allaah in ay tahay mid aan dhamays tirnayn taas oo aan LA jaan-qaadi Karin casriga , ama in ay banaan tahay in laysku xukumo wax aan shareecada Allaah ahayn , ama in uu jiro xukun kale oo ka wanaagsan xukunka Allaah , ama u dhigma.

2- sharci dajin: waana allaah oo rabinimadiisa lala qabsaday , qofka sidaa yeela oo sharci dajiyana waa daaquud , sida xibnaha baarlamaanka sharci dajinta oo kale , iyo dadka kale ee xeerarka dajiya , sida xeerarka qabaa'ilka, waxaa sidoo kale kamid ah musharixiinta isu soo sharraxa xilalka sharci dajinta, kuwa u codeeya , iyo qofka ka qayb qaata Aftida dastuurka.

Waxaana isku mid ah qofka sidaa yeelayo haduu cilmaani yahay , iyo haduu Muslim yahay

Maxaa yeelay sharci dajintu waa xaq allaah kaligii uu iska leeyahay , cid LA wadaagi kartana aanay jirin.

3- wax aan sharciga allaah ahayn oo wax lagu xukumo:

qofka sidaa sameeyana waa daaquud , sida xaakimka ama gar-soorayaasha xeerarka LA dajiyay wax Ku xukuma

Waxaa kale oo kamid ah musharixiinta fulinta dastuurrada , iyo kuwa u codeeya , waxaana isku mid ah qofka sidaa yeelayo haduu cilmaani yahay iyo haduu Muslim yahay , maxaa yeelay shirkiga iyo gaalnimada maslaxa looma gali karo.

4- wax aan sharciga Allaah ahayn oo loo xukuntamo: ayadoo loo laabanayo marka lays khilaafo xeerarka daaquudka.

Qofka sidaa sameeyana waa kaafir mushrik ah , mana jiraan wax kala duwanaasha ah oo u dhaxeeya qofka aaminsan in ay arintaas sax tahay iyo kan aaminsan in ay khalad tahay hadana u xukun tagayo ; si uu ugaaro maslaxo , ama isaga difaaco dhibaato , sida qofka u xukuntamo maxkamadaha daaquudka ee madaniga ah , kuwa ciidanka , kuwa ganacsiga , xeerarka qoysaska , iyo maxkamadaha caalimiga ah ee hoos taga qaramada midoobeey , IWM .

Wax cudur daar ah malahan qofka ku dhaca shirkul-akbar (gaalnimo) qofka LA qasbay mooyaane. Maslaxada iyo daruuraduna qasabka kamid ma ahan .

hadaba qofka waxaa waajib Ku ah in uu iska ilaaliyo gaalnimada noocyadeeda kala duwan , ama ka toobad keeno hadii uu horay gaalnimo ugu dhacay ..